SYKEHUSET I VESTFOLD

# Pasientinformasjon Induksjon- Somalisk

| | |
|---|---|
| *Gjelder for:* | Kirurgisk klinikk/Gynekologisk seksjon. Føde- og barselseksjon. Svangerskapspoliklinikk/Svangerskapspoliklinikk |
| *Dokumenttype:* | Pasientinformasjon |
| *Sist endret:* | 13.01.2026 |

## Macluumaad loogu talagalay bukaannada la siiyo daawada kalambisada.

### Daawada kalambisada

Bilowga ugu fiican ee dhalmada caadiga ah ayaa ah marka fooshu ay iskeed u bilaabato, iyada oo aan la is durin daawada kalambisada.

Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood waxaa khasab noqota in foosha loo kiciyo sababo kala duwan awgood, sababta ugu badan ee arrintan keentaana ayaa ah markii mudada uurka uu dhaafo waqtigiisa. Uurka ayaa loo tixgeliyaa mid waqtigiisii dhaafay marka uu gaaro 42 toddobaad iyo 0 maalmood (42+0), taas oo la micno ah 11 maalmood wixii ka badan qiyaasta taarikhda la qorsheeye ee dhalmada. Haddii xuubka uur-jiifku dillaaco ("biyihaha uurkana dilaacaan"), oo fooshuna aysan bilaaban 24 saacadood gudahood, kolkaa waxaa laguugi duri doonaa daawada kalmisada. Mararka qaar waxaa jiri kara sabab caafimaad, adiga ama ilmaha la xiriirta, oo keenta in laguugu duro daawada kalmisda.
Inaad maalmo badan uurka waqtigiisii ka dambayso mararka qaar ayaa waxay sababi kartaa adkaansho dhanka jirka iyo mid dareeneedba ama waxaad dhibaato ka qabaysaa hurdada ama waxaad dareemaysaa simo xanuun marka mudada uurkaaga uu sii dhammaanayo. Si kastaba ha ahaatee, waa in aad ogaataa in kicinta foosha ay inta badan keento in dhalmada lagu caawiyo qalab sida forceps ama vacuum, isla markaana ay jirto halis sare oo dhibaatooyin dhalmo ah oo ka imaan karta arintaa. Taasi waa sababta aanan u talinayn kicinta foosha haddii aynan jirin sababo caafimaad.

### Baaritaanada

Kahor inta aan la kicin foosha, waxaan la soconaynaa garaaca wadnaha ilmaha annagoo isticmaalayna CTG, taas oo diiwaangelisa garaaca wadnaha ilmaha iyo foosha ilmo-galeenka muddo 20–30 daqiiqo ah.
Sidoo kale, haddii loo baahdo in la qiimeeyo cabbirka ilmaha, xaddiga biyaha uurka ama arrimo kale oo la xiriira, waxaa la sameynayaa ultrasound gaar ahaan haddii ay ka badan tahay 14 maalmood tan iyo waqtigii ultrasound-kii ugu dambeeyay.
Waxaan sameeynaa baaritaan siilka ah si aan u qiimeyno afka ilmo-galeenkaaga. Tani ayaa ah in la hubiyo in laguu doorto habka kicinta foosha ee kuugu habboon. Waxaan si deggan u eegaynaa dhererka, sida uu u jilicsan yahay, booska uu ku yaallo, iyo inta uu u furmay afka ilmo-galeenka. Tani ayaa go'aamin doonta habka kugu habboon adiga. Kicinta foosha way sahlan tahay marka afka ilmo-galeenka uu diyaar yahay. Taas awgeed, mararka qaarkood waxaan sugnaa hal ama laba maalmood haddii adiga iyo ilmahaaduba xaalad wanaagsan ku sugan tihiin.

### Qorshaha kicinta foosha:

Maalinta 1 katareetka baloonta ah/ jebinta biyaha, haddii ay suurtagal tahay

Maalinka 2: Siinta daawo lagu diyaariyo afka ilmo-galeenka ama jebinta

biyaha, haddii ay suurtagal tahay
Maalinka 3: Siinta daawo lagu diyaariyo afka ilmo-galeenka ama jebinta
biyaha, haddii ay suurtagal tahay
Maalinta 4: Jebinta biyaha / ama soomid, haddii la qorsheynayo qalliin
dhalmo
Kicinta foosha waxay qaadan kartaa waqti dheer. Hab-socodka kicinta foosha wuxuu qaadan karaa dhowr maalmood, waxaana caafimaad ahaan u adeegsanaa habab kala duwan oo lagu bilaabo foosha. Waxaa jira arrimo dhowr ah oo go'aamiya habka aan marka hore isku dayno.

## Balloon-ka Foley:

Waa qalab loogu talagalay in lagu kiciyo foosha dhalmada. Waxay u egyahay catheter-ka, wuxuuna leeyahay laba balloon oo ku yaalla qaybta dambe. Qalabka waxaa la gelinayaa daloolka afka ilmo-galeenka; kadibna balloon-ka gudaha waxaa lagu buuxiyaa qiyaastii 80 ml oo biyo milix ah, halka balloon-ka dibadda lagu buuxiyo 60–80 ml oo oo biyo milix ah. Tani waxay keentaa cadaadis farsamo, kaasi oo jilciya afka ilmo-galeenka, kana caawiya in kicinta foosha ay noqoto mid guul leh isla markaana waqtigeeda yaraado. Balloon-ka waxaa lagu reebaa afka ilmo-galeenka ilaa uu si iskiis u soo dhaco; ama, hadii uu wali ku sii jiro 12-24 saacadood, waala soo saari doonaa.
Bukaanada intooda badan waxaan kula talinaa inay guriga aadaan kadib marka Foley balloon-ka la geliyo; hase yeeshee, bukaanno qaarkood waxaa laga codsan karaa inay isbitaalka ku sii nagadaan sababo caafimaad oow good.
Waa wax caadi ah in dhiig-yar inuu yimaado marka balloon-ka la gelinayo. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad dareento wax yar oo xanuun ama foosho gaaban, balse inta badan way baaba'aan isla markiiba kadib marka balloon-ka la geliyo. Haddii xanuunka foosha uusan istaagin, waxaa laga dhimi karaa biyaha ku jira balloon-ka dibadda, ama haddii loo baahdo, sidoo kale balloon-ka gudaha.

## Diyaarinta afka ilmo-galeenka:

Si afka ilmo-galeenka si fiican loo diyaariyo, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daawooyin gaar ah oo jilciya, diyaariya afka ilmo-galeenka oo loo yaqaan (prostaglandins). Daawadu waxay ku timaadaa qaab kiniin ah oo aad qaadato labadii saacadoodba mar, ugu badnaann ilaa 8 kiniin maalintii.
Tirada qiyaasaha aad qaadanayso ilaa fooshu ka bilaabanayso ayaa ah mid kala duwan balse ugu badnaan waxaa la qaadan karaa muddo 2 maalmood ah. Qaar ka mid ah dadka waxay la kulmaan xanuun fool oo gaagaaban oo soo noqnoqda, mararka qaarna xanuun leh, kuwaas oo la xiriira daawadan (foosho aad u badan).
Haddii adiga iyo ilmahaaduba aad caafimaad qabtaan, badanaa waxaad awoodi doontaa inaad kiniinnadan ku isticmaasho gurigaaga. Haddii laguu oggolaado inaad isbitaalka ka baxdo, waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan.

## Jebinta biyaha uurka (amniotomy):

Marka afka ilmo-galeenka si ku filan u diyaarsan yahay, dhakhtar ama umuliso ayaa si qorshaysan u jebin kartaa xuubka uurka si biyuhu u soo daataan. Tani badanaa waxay keentaa in fooshu ay bilaabato. Ka dib 1-3 saacadood, waxaan qiimeyn doonnaa inaad sidoo kale u baahan tahay in laguu bilaabo daawada laga qaato xididka ee dhibicda (oxytocin) si ay qayb uga qaadato kicinta foosha. Haddii loo baahdo, daawada waxaa lagugu bilaabi doonaa qiyaas yar, waxaana si tartiib ah loogu kordhin doonaa ilaa fooshu noqoto mid ku filan in dhalmadu bilaabato.

Xiriirriyaal leh macluumaad dheeraad ah:

Helsenorge.no: https://www.helsenorge.no/en/childbirth/induced-labour/

**Ka warhayta:**

Mararka qaarkood waxaa lagu qasbanaadaa in dib loo dhigo kicinta foosha ee la qorsheeyay, maaddaama xarunta dhalmada aysan mar walba awood buuxda u lahayn. Waa inaan hubinno in ay jiraan qolal dhalmo oo cadad ahaan kuugu filan iyo shaqaale diyaar ah si ay kuu taageeraan inta aad dhalayso.

Sababta kicinta foosha:

Taariikhda kicinta foosha:

Maalinta kicinta foosha, fadlan iskeen qaybta dhalmada (4C) qiyaastii 08:00 subaxnimo.

Ku habboon kicinta foosha ee guriga lagu sameeyo adigoo isticmaalaya Foley (tuubo yar oo

balloon leh):Haa Maya

Ku habboon kicinta foosha ee guriga lagu sameeyo iyadoo la diyaarinayo afka ilmo-galeenka: Haa May